HM Government

Grenfell community updates

# Grenfell Tower: habraaca sida taxadarka leh loogu duminaayo Towerka

Waxaan aqoonsanahay in Grenfell Tower ay muhiimad qoto dheer u leeyahay dadka ay saameynta ugu badan ku yeelatay masiibada iyo dhulkuna wuxuu ahmiyad u leeyahay qoysaska. Waxaan dooneynaa inaan kuu sheegno sida dowlada iyo qandaraaslayaasheenu ugu diyaar garoobayaan inay si taxadar leh u dumiyaan Grenfell Tower.

Xogtaan cusub waxay sharaaxaysaa sida aan ugu fulin doonno shaqadan qaab xasaasi ah oo ixtiraam leh, sida aan wax uga qabanayno arrimaha muhiimka kuu ah, waxayna sharaxaysaa meesha aad ka heli karto xog dheeraad ah ama taageero dheeraad ah.

Waxaan dooneynaa inaan kuula wadaagno xogta qaab faa'ido kuu leh. Waxaan ku siin doonaa xogo cusub oo joogto ah iyo faahfaahin dheeraad ah inta lagu jiro diyaarinta. Waxaad la kulmi kartaa saraakiisha, iyo qandaraaslayaasha ugu weyn ee qaban doona shaqadaan, shirar isdaba joog ah oo looga hadlayo shaqadaan ayaa la qaban doonaa, la wadaag walaaca iyo su'aalaha aad qabto. Waxaan ku faraxsanahay inaan kuu diyaarino inaan kuula hadalno si shaqsi ah ama koox ahaan, waxaan sii wadi doonaa inaan si dhow ula shaqeyno kooxaha iyo ururada deegaanka si aan u hubinno inay heleen xogta ay u baahan yihiin.

Waxaad had iyo jeer nagala soo xiriiri kartaa GrenfellTowerSite@communities.gov.uk

Xogtaan cusub waxay ka hadlaysaa:

- **Sida Towerka qaab taxadar leh loogu dumin doono**
- **Diyaarinta shaqooyinka xagaaga**
- **Meel dhigista agabyada Towerka**
- **Muuqaalka Towerka: Calaamadaha iyo Muuqaalka**
- **Waxa aad arki doontaa inta shaqada la qabanayo**
- **Dhowrista goobta**
- **Caafimaadka iyo badqabka**
- **Cidda fulin doonta hawshaan**

## Sida Towerka qaab taxadar leh loogu dumin doono

**Dowladda waxaa ka go'an inay hubiso in dhammaan shaqooyinka ka socda goobta Grenfell Tower loo fuliyo nidaam heer sare ah. Waxaan sii wadi**

**doonnaa inaan hubino in dhammaan shaqooyinka goobta ay ixtiraamaan muhiimada dhismaha, ay tixgeliyaan, ka warqabaan waxyeellada ayna yareeyaan carqaladeynta dadka ku nool, kuwa wax ku baranaya iyo dadka ka shaqeeya meelaha u dhow.**

- Towerka waxaa si taxadar leh looga qaadi doonaa dahaarka cad ee saarnaa. Nidaamkaan waxaa inta badan loo adeegsadaa dhismooyinka waawayn ee aagga ku yaala. Nidaamkeenu wuxuu ixtiraami doonaa duruufaha gaarka ah ee masiibada iyo muhiimada dhismuhu leeyahay.

- Shaqadu waxay ka bilaaban doontaa dusha sare ee dhismaha waxayna usoo degaysaa qaybaha hoose ee dabaqa. Waxaan rajeynaynaa in qayb kasta ay qaadato qiyaastii bil si uu si taxadar leh loogu dego.

- Qaybaha yaryar ee Towerka waxaa lagu dhex burburin doonaa gudaha dhismaha. Qaybo badan oo ka mid ah dhismaha, sida tiirarka banaanka, ayaa laga saari doonaa qaybaha dabaqa waxaana loo qaadi dooonaa banaanka ayadoo konteenaro lana adeegsanaayo qalabka dhismaha.

## Diyaarinta shaqooyinka xagaaga

- Qalabka dhismaha waxaa lagu dhejin doonaa goob ku taala dhinaca bari ee Towerka. Marka shaqadu bilaabato, qalabka dhismaha ayaa loo isticmaali doonaa in lagu qaado waxyaabaha laga soo saaro Towerka, waxaana lagu rari doonaa loori si goobta looga qaado.

- Waxaa jiri doona isbadello lagu sameynaayo dahaarka dhismaha si loogu diyaar garoobo shaqada Towerka. Tan waxaa kamid ah dahaar labaad oo dhismaha lagu wareejinaayo.

- Calaamad labaad oo dhismaha lagu wareejinaayo ayaa lagu rakibi doonaa. Waxaad hoos ka akhrin kartaa xog badan.

## Meel dhigista agabyada Towerka

**Waxaan fahamsanahay in dhammaan waxyaabaha laga soo saaro Grenfell Tower ay micno u leeyihiin qoysaska waxaana ula dhaqmi doonaa qaab xushmad iyo daryeel leh.**

- Dowlada waxaa ka go'an inay la shaqeyso guddiga xusuusta ee Grenfell Tower ee madaxabanaan iyo bulshada si ay u helaan aragtida bulshada ee xuska.

- Waxaan arrimaha Towerka iyo goobta ka dhignaa kuwo laga wada qaybqaato sida astaamaha xusuusta, haddii bulshadu dooneyso. Waxaan qoysaska u qornay xog ku aadan sida aan u taageeri karno tixgelinta arrintaan xilliga dayrta.

- Waxaan si xasaasi ah uga saari doonaa, u xafidi doonaa oo si badqab leh u keydin doonnaa astaamaha dhismaha iyo agabyada Towerka sida kula heshiiyay bulshada maadaama aan si taxadar leh u dumino dhismaha.

- Wax kasta oo laga saaro Towerka waxaa lagu rari doonaa looriyo aan calaamad lahayn oo si taxadar leh loo daboolay ka hor inta aan laga bixin goobta.

- Waxaan hadda la hadlaynaa qoysaska dadku ka dhinteen iyo dadka ka badbaaday goobta labaad, oo gooni ka ah goobta xusuusta ee North Kensington, oo aan ku soo jeedino agabka Tower ee sida taxadarka ah loo dhigi doono. Tani waxay noqon doontaa meel habboon, la heli karo, oo muhiim ah oo ay qoysasku ay awoodi doonaan inay booqdaan, iyadoo la raacaayo tallooyinka ay sameeyeen Guddiga Xusuusta Grenfell Tower ee Madaxa-bannaan. Waxaan la hadlaynaa hoggaamiyaasha diinta si ay nooga waaniyaan tixgelinada diyaarinta dhulka, meel kale geynta agabyada iyo daryeelka muddada-dheer.

## Muuqaalka Towerka: Calaamadaha iyo Muuqaalka

**Waxaan ognahay in booska Towerka ee cirka uu muhiim yahay.**

- Waxaan u isticmaali doonaa muuqaal si aan u abuurno joogitaan muuqda oo laga arki karo cirka. Waxaan raadineynaa siyaabo kala duwan oo aan ku muujin karno Tower-ka. Waxaan la wadaagi doonaa sawirada dookhyada shirarka bulshada. Haddii aadan awoodin inaad ka qaybgasho oo aad jeclaan lahayd inaad wax badan ka ogaato, nagala hadal ama eeg sawirada waxa ay ka dhignaan karto, fadlan fariin noogu soo dir ciwaanka ku qoran dhamaadka xogaha cusub si aad noogu diyaariso inaad nala hadasho.

- Waxaan hayn doonaa calanka naqshadada wadnaha leh ee cagaaran. Waxaa lagu wareejin doonaa dhismaha hadba mar, maadaama dahaarka hore ee dhismaha la rakibay oo loo baahan yahay in si taxadar leh loo dumiyo.

- Calaamada ayaa ku sii muuqan doona dusha sare ee Towerka ilaa ay shaqadu bilaabmayso. Ka dibna calaamad labaad, oo lamid ah ayaa lagu rakibi doonaa agagaarka qaybta hoose ee Tower. Tani waxay ka dhigan tahay inay jiri doonaan laba calaamad muddo gaaban. Calaamada dusha sare ka dhegan ayaa markaas kadib la saari doonaa waxaana lagu rakibi doonaa meel hoose. Habeenkii oo dhan, calaamadaha waxaa lagu iftiimin doonaa layr cadaan ah, sida hadda.

## Waxa aad arki doontaa inta shaqada la qabanayo

**Nidaamkeenu waa inaan ixtiraamno xasaasiyada dhismaha inta shaqadu socoto.**

- Shaashad - xayndaabka alwaax ku wareegsan oo ku dhegan geeska goobta - ayaa kasii muuqan doonaa goobta hadda. Ma arki doontid goobta marka aad banaanka istaagto.

- Ma awoodi doontid inaad aragto dhismaha. Shaqada ayaa ka socon doonaa gudaha xayndaabka, xaandaab ah 2 mitir oo ku yaala meel ka sarreysa aagga shaqada.

- Dhammaan agabyada laga soo saaro Towerka waxaa lagu rari doonaa looriyo aan calaamad lahayn oo si taxadar leh loo daboolay ka hor inta aan laga bixin goobta.

## Dhowrista goobta

**Waxaan fahamsanahay in qaar ka mid ah qoysaska laga yaabo inay doonayaan inay ku muujiyaan ixtiraamkooda**
**darbiga xusuusta, marka shaqadu bilaabato gaar ahaan taariikhaha muhiimka ah ama horumarka la gaaray.**

- Waxaan taageernay qoysaska dadka ka dhinteen, dadka ka badbaaday ee xaafada u dhaw degan si ay u bixiyaan ixtiraamkooda goobta.

- Waxaan awoodnaa inaan la wadaagno jadwalada waqtiga loogu talagalay waqtiga shaqada lagu qaban doono dabaqyo gaar ah oo Towerka kamid ah. Waxaad nagala soo xiriiri kartaa ciwaanka iimaylka ee hoose haddii aad jeclaan lahayd inaan si toos ah kuula wadaagno xogtaan.

## Caafimaadka iyo badqabka

**Caafimaadka iyo badqabka bulshada iyo dadka ka shaqeeya goobta ayaa weli ahmiyadeena koowaad ah.**

- Qorshaha si taxadar leh loogu duminaayo Towerka waxaa loogu talagalay in lagu yareeyo buuqa iyo carqaladeynta. Waxaad ka akhrisan kartaa xog badan oo ku saabsan tallaabooyinka xakamaynta gaarka ah ee lagu meelayn doono xogaha cusub ee labaad ee bulshada ee lagu soo lifaaqa xogtaan.

- Waxaan sii wadi doonaa inaan si dhow u maareyno oo aan ula socono dhismaha inta lagu jiro muddada shaqada. Tan waxaa ka mid ah nidaam lagu kormeeraayo Towerka 24/7 iyo kormeerka joogtada ah iyo hubinada dabaqa ee ay sameeyaan khubarada injineernimada dhismaha.

- Shaqooyinka waa lala socdaa, Maamulaha Caafimaadka iyo Badqabka (Health and Safety Executive, HSE) wuxuu ilaalin doonaa doorka fulinta madaxbannaan. HSE waxay booqdeen goobta tan iyo 2017 waxayna sameeyaan kormeero si loo qiimeeyo u hoggaansanaanta xeerarka sida Xeerarka Dhismaha (Naqshadeynta iyo Maareynta goobta) waxayna awood u leeyihiin inay soo saaraan ogeysiisyada Hagaajinta ama ogeysiisyada Mamnuucida, waxayna qaadaan tallaabo sharci haddii xeerarka la jabiyo.

- Waxaan si dhow ula shaqeyn doonaa hawlwadeenada deegaanka iyo khubarada qaranka sida Hay'adda Ammaanka Caafimaadka ee UK.

## Cidda fulin doonta hawshaan

- Waxaan xaqiijinay in Deconstruct UK (DUK), oo ah qandaraaslaha ugu weyn ee mas'uulka ka ah badqabka iyo dayactirka maalinlaha ah ee goobta, ay mas'uul ka noqon doonto shaqada sida xasaasiga ah iyo taxadarka leh loogu duminaayo Towerka.

- DUK waxay ka shaqeyneysay goobta Grenfell Tower tan iyo 2017 waxayna horumarisay aqoon iyo khibrad ballaaran ee Towerka. Waxaan rumeysanahayi in marka la eego diiwaanka raadraaca DUK ay ka dhigan yahay inay tahay cidda

ugu habboon ee shaqadaan si ammaan ah ugu fulin karta, xasaasiga ah oo la tixgelin karta baahida qoysaska iyo dadka u dhow. DUK waxay shahaado ka haysataa British Standards Institute waxayna leedahay aqoonsiyada sida Qorshaha Qandaraaslaha Badqabka ah ee kartida tayada iyo badqabka.

- Waxaad heli doontaa fursado joogto ah oo aad kula kulmayso DUK si aad ugala hadasho shaqada oo aadna su'aalo weydiiso. Waxaan kuu soo qornay warqadaan si aad uga hesho faahfaahinta kulanada soo socda.

## Tababarayaasha Caafimaadka iyo Badqabka

Waxaan naga go'an inaan hubino in taageerada joogtada ah ee bulshada laga helo nidaamka oo dhan. Waxaan si dhow ula shaqayneynaa Waaxda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada iyo NHS si loo hubiyo in adeegyada ku habboon la heli karo iyada oo loo maraayo nidaamkaan xasaasiga ah. Waxaan sidoo kale kala shaqayneynaa Waaxda Waxbarashada arrimaha ku saabsan taageerada dugsiyada, carruurta iyo dhalinyarada.

Haddii aad ka walaacsan tahay caafimaadkaaga gabi ahaanba, fadlan la xiriir dhakhtarkaaga (GP). Wuxuu qiimeyn doonaa baahiyahaada wuxuuna kuu gudbin doonaa daryeelka takhasuska ee saxda ah. Haddii aad jeclaan lahayd inaad la hadasho qof, fadlan wac Adeegga Badqabka ee Grenfell ood ka wici karto 020 8637 6279 (8da subaxnimo ilaa 8da habeenimo maalin kasta) ama Khadka Tallooyinka Degdegga ah ee CNWL oo ah 0800 0234 650 (ka dib 8da habbeenimo iyo 24 saacadood maalintii) grenfell.wellbeingservice@nhs.net Sidoo kale waxaad booqan kartaa www.grenfellwellbeing.cnwl.nhs.uk si aad u hesho xog.

## Sida naloola hadlo ama loo helo xog dheeraad ah

Fadlan nala soo xiriir haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaac ah oo la xiriira shaqada ama aad dooneyso inaad isku diyaariso inaad nala hadasho. Waxaan u qornay qoysaska inay kugu martiqaadaan kulanada bulshada saraakiisha iyo DUK, oo ah qandaraaslaha ugu weyn, oo aad ka heli karto xog dheeraad ah oo ku saabsan shaqada. Waxaan diyaar u nahay inaan kuula hadalno shaqsi ahaan ama koox ahaan waqti, taariikh, iyo goob adiga kugu habboon.
Si aad u hesho faahfaahintaan ama si aad wax su'aalo ah noo waydiiso, fadlan noogu soo dir iimayl halkaan: GrenfellTowerSite@communities.gov.uk

Si aad u hesho xogihii ugu dambeeyay ee ku saabsan Grenfell Tower, iyo si aad iska diiwaangeliso fariimaha iimaylka, fadlan booqo:
www.gov.uk/grenfell-community-updates ama iskaan garee koodhka QR-ka ee hoose.

**Grenfell Tower site management team**
**Ministry of Housing, Communities and Local Government**